



Diiwangelinta Fasalka Barbaarinta caruurta ee Dugsiyada Magaalada Westerville

**Ilmahaagu ma dhashay
Sebtembar 30, 2018 ama kahor?**

Hadday jawaabtaadu tahay **HAA**, waa waqtigii aad iska diiwaangelin lahayd Fasalka Barbaarinta caruurta sanad dugsiyeedka 2023-2024! Carruurta waxaa looga baahan yahay inay dhammeeyaan Fasalka Barbaarinta caruurta ka hor inta aysan gelin fasalka koowaad.

Diiwaangelinta Fasalka Barbaarinta caruurta Onlaynka ah waxay Furmaysoo 17-ka Janaayo, 2023 @ 10:00 subaxnimo.

- Miyaad jeclaan lahayd in ilmahaagu dhigto Fasalka Barbaarinta caruurta Maalin Barkeed ama Maalinta oo Dhan?

Dugsiyada Magaalada Westerville waxay bixiyaan Fasalka Barbaarinta caruurta ee Maalin Barkeed ah iyo Maalinta oo Dhan. Waa in aad codsataa Fasalka Barbaarinta caruurta Maalinta oo Dhan taas oo qayb ka ah codsiga diiwaangelinta onlaynka ah.

 - Kharashka Waxbaridda Fasalka Barbaarinta caruurta Maalinta oo Dhan waa \$3,000-kun sanad dugsiyeedka. (Waxaad codsan kartaa dhimista kharashka waxbarashada ama mid bilaash ah.)
 - Meelaynta Fasalka Barbaarinta caruurta Maalintii oo dhan waxay ku dhacdaa qaab bakhtiyaanasiib ah oo la qabto Maarso 2023.
 - Si laguugu soo daro bakhtiyaanasiibka, Waalidiintu waa inay muujiyaan inay danaynayaan Fasalka Barbaarinta caruurta Maalinta oo Dhan ah marka ay buuxinayaan codsiga diiwaangelinta onlaynka ah.
 - Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Fasalka barbaarinta caruurta Maalinta oo Dhan ah, fadlan booqo www.wcsoh.org/ADK.
- Ma garanaysaa dugsiyada hoose ee ilmahaagu dhigan doono?

Booqo <http://www.croppermap.com/westerville/> oo qor ciwaanka wadada aad dagan tahay. Haddii aad u baahan tahay caawimo, wac waaxda Gaadiidka 614-797-5950.
- Ilmahaagu ma dhigtaa Xarunta Waxbarashada Barbaarinta Dugsiga ka hor ee WCS?
 - Haddii ay jawaabtaadu tahay haa, qasab **MA AHAN** in aad iska diiwaangeliso Fasalka Barbaarinta caruurta.
 - Haddii aad rabto inaad ku darto ilmahaaga (ardayga hadda dhigta Dugsiga barbaarinta Dugsiga ka hor ee ELC) bakhtiyaanasiibka Fasalka Barbaarinta caruurta Maalinta oo Dhan, buuxi Foomka Google-ka ee lagu soo diray maalinta ay diwaan-gelinta Fasalka Barbaarinta caruurta furanto, taasoo kabeegan 17-ka Janaayo, 2023.
- Wax badan ka ogow hawlaha iyo Fursadaha ku saabsan Fasalka Barbaarinta caruurta

Hubi inaad timaaddo kulanka *Fasalka Barbaarinta 101* ee dugsiyada hoose ee ilmahaaga bisha Janaayo. Maamulayaasha iyo macallimiinta ayaa kuu sharrixi doona nidaamka diiwaangelinta oo ku siin doona fikrada ku aadan waxa ilmahaagu filan karo iyo maalinta caadiga ah ee Fasalka Barbaarinta caruurta.

Faahfaahinta ku saabsan *Fasalka Barbaarinta caruurta 101* ayaa lagu shaacin doonaa www.wcsoh.org/kindergarten ama waxaad wici kartaa dugsiyada hoose ee ilmahaaga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.